



Laanta luuqadda afka hooyo

In la dhowro oo la hormariyo afka hooyo waa mid aad muhiim u ah aadna uga qayb qaadata barashada afafka kale, barashada maaddooyinka kale iyo weliba ardayga ku hadla luuqado badan uu gaarayo horumar aqoonsi ardaynimo.

Laanta ama qaybta afka hooyo ee degmada Siguna waa laan gaar ah lehna maamulaheeda, kaasoo ah masuulka guud ee laantaas. Laantaasi waxay diyaar kuula tahay barashada afka hooyo laga bilaabo xannaanada ilaa iyo fasalka sagaalaad.

Waalidiinta ayaa u dalbaya carruurtooda barashada afka hooyo. Hadda waxaan heynaa ilaa iyo 1200 arday oo waxbarashada afka hooyo ku hela 25 luuqadood. Laanta afka hooyo waxay kaloo masuul ka tahay iney bixiso caawimo xagga waxbarasha ah oo ay siiso ardayda cusub iyo kuwa luuqaddooda iswidhishku aysan ku filnayn.

Kaalmada waxbarashada waxaa ardayga u dalba iskuulkiisa. Ardayda cusub waxaa daraasad ku sameeya macallinka afka hooyo iyo macallinka maaddooyinka kale si loo ogaado heerka waxbarashadiisa ee maaddo kasta.

Haddii aad u baahan tahay macluumaad intaa ka dheer riix qeybta bidixda halkaasoo aad ka heli doonto shaqaale ka shaqeeya laanta afafka.

